

Kuwan wax ayaa laga beddelay tan iyo markii u dambeysay ee lagu soo bandhigay onlayn ahaan. Waxa jira isbeddelo yaryar oo aagagga oo dhan ah - oo la xidhiidha agabka maamulka.

Su'aalaha Badanaa La Isweydiiyo ee La Cusboonaysiiyey ee ku saabsan qareennada la maalgeliyey

Su'aal	Jawaab
Waa kuwee qareennada la maalgaliyay?	Qareennada la maalgeliyey waxa ay siin karaan talo, taageero, iyo matalaad sharci ah qoysaska Shaheed inta lagu gudo jiro marxaladaha hore ee baadhitaanka Madaxa Baadhitaanka Dhimashada.
Sidee qareennadan loo maalgeliyaa?	Joshua, Hanne, Anne, Nigel iyo Kathryn waxa si toos ah u maalgelisa Wasaaradda Cadaaladda. Maalgelintani waa ka gaar caawimada sharciyeed, taas oo lagu bixiyo sida uu dhigayo Sharciga Adeegyada Sharciyeed ee 2011. Maalgelinta kaalmada sharciyeed keliya waxa la heli karaa haddii Madaxa Baadhitaanka Dhimashada uu go'aansado in uu qabto baadhitaan.
Miyey dhibbenayaasha weerarrada masjidku codsan karaan kaalmo sharciyeed hadda?	<p>Kaalmada sharciyeed lama heli karo marxaladdan ka midka ah hannaanka la xidhiidha baadhista dhimashada. Sababtoo ah maalgelinta kaalmada sharciyeed keliya waxa la heli karaa haddii Madaxa Baadhitaanka Dhimashadu uu go'aansado in uu sameeyo baadhitaan</p> <p>Haddii Madaxa Baadhitaanka Dhimashadu uu go'aansado in uu sameeyo baadhitaan, qoysaska iyo dhinacyada kale ee danaynaya si rasmi ah baa loo ogaysiin doonaa, taas oo ay kaddib codsan karaan kaalmo sharciyeed haddii ay doonayaan.</p>

Su'aal	Jawaab
Yaa heli kara qareennada la maalgeliyey?	Waxaad si toos ah u heli kartaa qareennada la maalgeliyey haddii aad xubin ka tahay qoyska Shaheed.
Miyaan heli karaa qareennada haddii aan dhibbane u ahaa dhaawacyo nabarro rasaaseed ama imika intii lagu gudo jirey weerrarada, balse aanan xubin ka ahayn qoyska Shaheed?	Marxaladdan, qareennada la maalgeliyey waxay mudnaanta siinayaan qoysaska Shaheed. Waannu aqoonsannahay in dhibbanayaasha kale ay u baahnaan karaan in ay helaan mid ka mid ah qareennada. Haddii aadan xubin ka ahayn qoyska Shaheed oo aad jeclaan lahayd inaad hesho taageeradan, fadlan iimeyl u dir coronial.response@justice.govt.nz ama wac (03) 471 5199.
Miyey ururradu heli karaan qareennada la maalgeliyey?	Maya, ururradu ma heli doonaan qareennada la maalgeliyey - waxay u baahnaan doonaan in ay iyagu iskood u abaabushaan oo u maalgeliyaan qareenadooda gaarka ah.
Ma inaan isticmaalaa mid ka mid ah qareennada liiska ku qoran?	Maya, kuma qasbanid in aad adeegsato mid kamid ah qareennada ku jira liiska la maalgeliyey. Qareennadan waxaa si buuxda u maalgeliya Wasaaradda Caddaaladda, taas oo ka dhigan inaad bilaash ku adeegsan karto haddii aad u qalanto taageerada. Fadlan ogow in haddii aad go'aansatid in aad adeegsato qareen aan ku jirin liiskan, in aysan Wasaaraddu kharashka kaa bixineynin.

Su'aal	Jawaab
<p>Miyaan u baahanahay inaan adeegsado qareen gebi ahaanba?</p>	<p>Waa ikhtiyaarkaaga inaad adeegsato qareen. Haddii aad doorato inaad adeegsan qareen, waxaad ka qaybgeli geli kartaa hannaanka adiga laftaadu ama waxaad ku matali kartaa naftaada dhegaysi baadhitaan haddii mid la amro.</p>
<p>Miyey dad kala duwan oo ka socda qoys isku mid ah heli karaan qareenno la maalgeliyey oo kala duwan?</p>	<p>Waxaannu soo jeedineynaa in hal qof oo ka socda qoyskiiba uu noqdo qofka muhiimka ah ee la xidhiidhaya qareenka la maalgeliyey. Waxaa suurtagal ah in aad leedihiin wakiilka qoyska oo hawshaas u dhiiban kartaan.</p> <p>Waanu fahamsanahay in ay dhici karto xaalad uu qoysku lahaado wakiilo badan kuwaas oo danahoodu kala duwan yahay oo u baahnaani karaan qabanqaabo kale. Waannu la shaqeyn karnaa ehelada Shaheed xaaladahan si ay muraadkooda u gaaraan. Fadlan la xidhiidh Xafiiska Madaxa Baadhitaanka Dhimashada adiga oo kala xidhiidhaya iimeylka coronial.response@justice.govt.nz ama ka wacaya (03) 471 5199.</p> <p>Waxaan idinka codsaneynaa in haddii xaaladdiina qoyska ay tahay sida kor ku xusan inaad u sheegtaan qareenka aad xulateen. Waxtar bey u tahay in ay ogaadaan in qoyskiinnu uu hal garyaqaan ka badan adeegsanaayo.</p>

Su'aal	Jawaab
<p>Ma beddeli karaa qareenkayga hadhow haddii aan rabo?</p>	<p>Haa. Waxaanu kaa codsanaynaa inaad u sheegto qareenkaaga go'aankaaga beddelitaanka si uu u siin karo adeegyadiisa qoys kale oo laga yaabo inay u baahan yihiin.</p>
<p>Qasab miyaa in garyaqaankaygu tuulada ama magaalada aan joogo igula sugan yahay? Maxay ka dhigan tahay haddii kala meel aan joogno?</p>	<p>Maya, garyaqaanku qasab maaha in aad isku magaalo joogtaan. Wasaaradda Cadaaladdu waxa ay siin doontaa qareenkaaga kharashka socdaalka uu kugu la kulmayo haddii uu yahay qareen la maalgeliyey.</p> <p>Inta badan waxaad u baahan tahay in aad isticmaashid telefoonka, ama muuqaalka iyo maqalka ama iimeylka si aad ula hadashid garyaqaankaaga. Haddii garyaqaankaagu u baahdo in uu dhoof kuugu yimaado si aad isu hor fadhiisataan, uma baahnid in aad tan adigu abaabushid, garyaqaankaaga ayaa qabaqaabinaaya kulankaas.</p>
<p>Miyaa la iga rabaa inaan iska bixiyo lacagta turjubaanka marka aan la kulmayo qareenkayga la maalgeliyey?</p>	<p>Maya. Fadlan ogeysii garyaqaankaaga haddii aad u baahantahay in luqadda lagaa caawiyo inta aadan la kulmin garyaqaanka si laguugu diyaariyo.</p>

Su'aal	Jawaab
<p>Ma jirtaa xaddidaad saaran tirada qoysaska Shaheed ee uu hal qareen oo la maalgeliyey uu taageeri karo?</p>	<p>Maya. Si kasta ha noqotee, qareennadu gaarkooda ayey go'aankan u gaadhi karaan taas oo ku xidhan culayskooda shaqo iyo danaha is diidaya ee u dhexeeya macaamiishooda hadda iyo kiiskaaga.</p> <p>Haddii aad ka welwelsantahay waqtiga uu qareenku kuu hayo, waxaa mudan in aad la xidhiidho oo aad arrintan kala hadashid ka hor inta aadan qaadan go'aankaaga.</p> <p>Waxaannu soo jeedineynaa in had iyo jeer aad garyaqaanka waqti hore aad la xiriirtid. Haddii aad waqti hore ogeysiisid in aad rabtid in aad la hadashid garyaqaanka, waxay u oggolaaneysaa in uu sii qorsheysto waqtigiisa, muddo kugu filanna kuu qoondeeyo.</p>
<p>Miyey xaddidan tahay dhererka muddada aan la qaadan karo qareenkayga la maalgeliyey?</p>	<p>Maya. Si kasta ha noqotee, haddii aad isleedahay waqti badan ayaad u baahan kartaa oo aad la qaadato qareenkaaga, waxaannu kuu soo jeedineynaa in aad sida ugu dhakhsaha badan ula xidhiidho isaga. Tani waxa ay ka caawin doontaa isaga inuu qorsheeyo oo uu kuu sameeyo wakhti badan oo aad heli karto isaga si uu kuu taageero.</p>
<p>Miyaa qareenkayga la maalgeliyey i caawin karaa marxalad kasta inta hawshu socoto?</p>	<p>Qareenkaaga la maalgeliyey waad heli kartaa illaa Madaxa Baadhitaanka Dhimashadu uu go'aan ka gaadho tallaabooyinka xiga ee hannaanka la xidhiidha baadhitaanka dhimashada. Ma jirto waqti go'an oo go'aanka la gaarayo.</p>

Su'aal	Jawaab
	<p>Haddii Madaxa Baadhitaanka Dhimashadu uu go'aansado in uu qabto baadhitaan, waxaa lagu siin doonaa macluumaad ku saabsan sida loo helayo taageerada sharciga ah inta lagu gudojiro marxaladda baadhitaanka ee hannaanka la xidhiidha baadhitaanka dhimashada.</p>
<p>Maxay tahay taageerada dhinaca sharciga ee ay i siin karaan qareennada la maalgeliyey?</p>	<p>Ma jiraan wax xaddidaadyo ah oo ah nooca adeegyada sharciga ah ee qareennada la maalgeliyey ay bixin karaan inta ay ku dhex jiraan hannaanka la xidhiidha baadhitaanka dhimashada.</p> <p>Qareennada la maalgeliyey waxa ay:</p> <ul style="list-style-type: none"> • ku siin karaan macluumaad iyo talo, oo ay ku jirto talo sharciyeed, oo ku saabsan marxaladaha taagan ee hannaanka la xidhiidha baadhitaanka dhimashada • wax u qori karaan ama ay la hadli karaan iyaga oo adiga ku matalaya Madaxa Baadhitaanka Dhimashada • ka heli karaan macluumaad la xidhiidha kiiska Madaxa Dhakhaatiirta Baadheyaasha Sababta Dhimashada ama hay'ado kale iyagoo adiga ku matalaya • u hawlgeli karaan qareen ahaan ama adiga ayey ku matali karaan haddii loo baahdo

Su'aal	Jawaab
	<ul style="list-style-type: none"> • hubin karaan arrimaha aad ka walaacsan tahay in loo gudbiyey Madaxa Baadhitaanka Dhimashada si uu u eego (haddii ay kuwani ku jiraan awoodda sharci ee Madaxa Baadhitaanka Dhimashada).
Miyay jiraan waxyaabo aysan qareennada la maalgeliyey iga caawin kareynin?	<p>Qareennada la maalgeliyey kaama caawin karaan wax kasta oo aan xidhiidh la lahayn hannaanka la xidhiidha baadhitaanka dhimashada. Tusaale ahaan, kaa ma caawin karo:</p> <ul style="list-style-type: none"> • arrimaha dal soo galka • wax kasta oo la xiriira xukunka dembiilaha lagu ridey.
Yaan kala xiriiri kara sida aan u heli karo macluumaad dheeri ah?	<p>Haddii aad jeclaan lahayd macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida qareennada la maalgeliyey ay u shaqayn doonaan ka hor inta aadan go'aansan qareen, fadlan kala xidhiidh Xafiiska Madaxa Baadhitaanka Dhimashada iimeylka coronial.response@justice.govt.nz ama wac (03) 471 5199.</p> <p>Haddii aad hore u xulatey qareen la maalgeliyey oo aad su'aalna ka qabtid sida aad u wada shaqeyn doontaan, toos ayaad ula xidhiidhi kartaa qareenka. Waxa aad ka heli kartaa faahfaahinta xidhiidhkooda websaytkayaga Dadka taageeraya hannaanka la xidhiidha baadhitaanka dhimashada.</p>